# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Golihii 5aad, Kal-fadhigii 10$^{aad}$, Fadhigii 7$^{aad}$

*09 December 2024*

**Quraanka:** Md. Axmed Dayib Aadan (ku-cadeeye)

**Gudoonka: - Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**

**Ajandaha Fadhiga: -** Warbixinta *Wasiirka Wasaarada Warfaafinta iyo Dhaqanka ee xeerka warbaahinta*

**Guddoomiyaha:-** Waxaynu soo dhowaynaynaa Wasiir Cali, oo ka soo shaqeeyay, daba-joogay, isla markaana soo meel mariyay xeerkan, kana soo mariyay Golaha Wasiirrada. Maaddaama aynaan hubin xukuumaddiisii oo waqtigeedii dhammaaday, isla markaana aynaan garanayn halka ay wasiirradu ku dambayn doonaan, waxa aynu hubnaa in Mudane Cali, inta aanu naga tegin, uu xeerkan ka soo shaqeeyay. Sidaas awgeed, waxaanu ka codsanay inuu ra'yi guud inaga siiyo, isla markaana inoogu faahfaahiyo xeerkan.

**Md. Cali Xasan Maxamed (Cali-Mareexaan) Wasiirka Warfaafinta:-** "Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Shir-guddoonka, iyo Mudanayaasha sharafta leh, Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Sida uu Guddoomiyuhu sheegay, xeerkan dhawaan ayaa loo soo gudbiyay golayaasha sharci-dejinta, waana Xeerka Warbaahinta Qaranka JSL. Waxa uu beddelayaa xeerkii hore ee Xeer Lr. 27/2004, oo loo yaqaanay Xeerka Saxaafadda.

Xeerkani waa mid aad uga ballaadhan kii hore. Waa xeer ka kooban 72 qodob, isla markaana ka kooban 10 cutub. Xeerkani waxa uu daboolayaa arrimo badan oo muddo dheer laga doodayay, wuxuuna isu dheelli tirayaa xorriyadda saxaafadda, oo had iyo jeer la hadal hayo, iyo xuquuqda cidda ay saxaafaddu ka warramayso. Muranku had iyo jeer halkaas ayuu ka dhalan jiray; marba waxa lagu eedayn jiray in saxaafadda madaxbannaanideeda lagu xadgudbay, marna in saxaafaddu ku tumatay xuquuqda cidda ay wax ka qorayso. Xeerkani halkaas ayuu xalka ka keenay.

Waxa uu saxaafadda siinayaa xorriyadaha dastuuriga ah ee aasaasiga ah, sida ku cad qodobbada xuquuqaha ee Dastuurku sheegay. Sidoo kale, haddii saxaafaddu xadgudub samayso, xeerkani waxa uu dejinayaa hab sharci ah oo lagula xisaabtamo.

Xeerkani waxa uu meesha ka saarayaa in haddii saxaafaddu xadgudub samayso loo maro nidaamka ciqaabta dembiyada, taas oo had iyo jeer ay ka caban jireen saxaafadda adduunka. Halkii laga mari lahaa nidaamka ciqaabta, waxa loo marayaa nidaam madani ah, oo sharci ah, kaas oo ay fuliyaan maxkamadaha madaniga ah iyo garsoorka. Haddii ay maxkamaddu ku caddayso in xadgudub lagu sameeyay muwaadin, masuul dawladeed, shirkad, ama qaranimada wax dhaawacaya, waxa lagu xukumi doonaa sida uu dhigayo sharciga iyo xeerarka madaniga ah. Sidaas ayuu xeerkani isu dheelli tiray.

Xeerkani waxa ay isku waafaqeen dhinacyo hore khilaaf uga jiray, sida saxaafadda madaxbannaan oo ay hoggaaminayaan saxafiyiin madax-bannaan iyo ururradooda (SOLJA), hay'adaha kale ee saxaafadda, iyo xukuumadda iyo hay'adaha ay khusaysoba. Dhammaan dhinacyadu way isla eegtay, waxaana loo arkay xeer casri ah oo waafaqsan shuruucda caalamiga ah, Shareecada Islaamka, xeerarkeena iyo dhaqankeena. Sidaas awgeed, ma jiro khilaaf ka taagan saxaafadda iyo dawladda oo la xidhiidha xeerkan, waxaana Golaha Wakiillada loo hor keenay si ay waajibaadkooda sharci u gutaan.

Waxaan Golaha kula dardaarmayaa in kursiga aad ku fadhidaan laga yaabo in aragtiyo kala duwan laga qaato; qaar waxay isu arki karaan muxaafid, qaarna mucaarad. Anaguna anagoo muxaafid ah ayaanu xeerkan diyaarinay. Hase yeeshee, marka sharci-dejintu timaaddo, dhammaan dhinacyada ay khusayso way isla raaceen, aragtida guudna way isku waafaqeen.

Xeerkani waxa kale oo uu daboolayaa arrimo aad u muhiim ah, sida xuquuqda daabacaadda (copyright). Inkasta oo ay dhinacyo badan khusayso, xeerkan waxa uu si gaar ah diiradda u saarayaa saxaafadda. Warbaahin wax tabcaysa ama soo saaraysa lama oggola in si sharci-darro ah looga qaato, xeerkuna waxa uu qeexayaa habka loo kala xadaynayo iyo sida loo xallinayo.

Xeerkani waxa kale oo uu soo kordhiyay arrimo aan ku jirin sharciyadii hore, gaar ahaan ilaalinta xuquuqda wariyaha marka loo eego mulkiilaha warbaahinta. Badanaa warbaahinta waxa leh mulkiilayaal, wariyayaashuna way u shaqeeyaan. Marar badan marka saxaafaddu dooddo, waxa la yidhaahdaa xuquuqda saxaafadda ayaa la duudsiyay, hase yeeshee mararka qaar mulkiilayaasha ayaa ku xadgudba wariyayaasha. Xeerkani waxa uu kala ilaalinayaa mulkiilaha, tifaftiraha iyo wariyaha, wuxuuna ka hortagayaa in wariye lagu khasbo falal khaldan ama dano gaar ah.

Haddii hay'ad warbaahineed dembi gasho, qofka ugu horreeya ee masuulka noqonaya waa tifaftiraha, waxaana ku xiga mulkiilaha. Sidaas darteed, xeerkani waxa uu dejinayaa nidaam masuuliyadeed oo caddaalad ah.

Xeerkani waxa kale oo uu nidaaminayaa helitaanka wararka, wuxuuna saxafiga siinayaa awood buuxda oo uu uga heli karo xog hay'ad kasta iyo maamul kasta oo uu u baahdo. Sidoo kale, waxa uu mamnuucayaa ku xadgudubka goobaha xasaasiga ah sida amniga qaranka, ciidamada, iyo dacwadaha wali maxkamaduhu ku jiraan, si loo ilaaliyo nabadgelyada guud, qaranimada iyo anshaxa bulshada.

Xeerkani waxa uu reebayaa in saxafigu u shaqeeyo sida sirdoon, ama uu ku xadgudbo asturnaanta dadka. Tusaale ahaan, waxa aanu oggolaanayn in qof sawir qarsoodi ah laga qaado ama noloshiisa gaarka ah lagu farageliyo, xitaa haddii dalal kale sidaas u oggolaadaan. Dhaqankeena, diinteena iyo akhlaaqdeenu arrimahaas ma oggola.

Xeerkani waxa uu, sida uu dhigayo Qodobka 5aad ee Dastuurka JSL, mamnuucayaa wax kasta oo ka hor imanaya Shareecada Islaamka. Sidoo kale, waxa uu ku boorinayaa saxaafadda inay kobciso akhlaaqda diinta, waddaniyadda, jacaylka dalka, aqoonta, cilmiga, sayniska, iyo ilaalinta deegaanka. Xeerkani waxa uu ku dhisan yahay mabda'a ah in xorriyadda saxafigu ku dhammaanayso halka ay ka bilaabmayso xuquuqda qofka kale. Sidaas awgeed, xorriyaddu marka ay xadgudub noqoto, sharci ayaa lala xisaabtamayaa.

Ugu dambayn, xeerkani ma aha xeer ciqaabeed, balse waa xeer madani ah oo ku dhisan magdhow, ee aan ahayn ganaax ciqaabeed. Haddii magdhowga la bixin waayo ama xadgudubku noqdo mid soo noqnoqda, maxkamaduhu waxay qaadi karaan tallaabooyin kale oo sharci ah.

Dhammaan dhinacyada saxaafadda, warbaahinta, iyo hay'adaha xuquuqda aadanaha way ka qayb qaateen diyaarinta xeerkan, maanta-na way isku raacsan yihiin. Xeerkani waxa uu daboolayaa dhammaan noocyada warbaahinta, oo ay ku jiraan TV-yada, idaacadaha, jaraa'idka iyo baraha bulshada. Hal qof ama hal hay'ad warbaahineed ayaa gaadhi karta boqolaal kun ama malaayiin dad ah, sidaas awgeed baahida xeerkan aad bay u weynayd. **Aad iyo aad ayaan idiinku mahadcelinayaa."**

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada**
**---------------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
**------------------------------------------**